

Taageero dheeraad ah oo loogu talagalay nidaamka waxbarashada Koraysa ee Alberta

July 23, 2024 [Weydiimaha warbaahinta](#)

Maalgelinta cusubi waxay wax ka qaban doontaa is-diiwaangelinta sii kordheysa waxayna awood u siin doontaa maamulka dugsiya inay yareeyaan cadaadiska shaqada ee kordhay ee dugsiyada K-12.

Tirada dadka Alberta waa mid kor u kacaya oo keenaya koboc aan horay loo arag oo ku yimid nidaamkayaga waxbarasho, iyadoo ku daraysa tiro taariikhi ah oo arday cusub ah ee gobolka oo dhan ah sannad dugsiyeedka 2024-25. Dawladda Alberta way aqoonsan tahay oo way ka damqatay caqabadaha maamullada dugsiyadu la kulmaan xagga kordhinta isqorista, kor u kaca kharashaadka hawlgalka iyo sicir bararka. Taasi waa sababta ay u maalgelinayso \$215 milyan si ay uga caawiso yaraynta cadaadisyan, laga bilaabo sannad dugsiyeedka 2024-25.

Maalgelintani waxay balaadhin doontaa maalgelinta hawlgelinta ee maamullada dugsiyada ee gobolka oo dhan waxayna kordhin doontaa tirada fasallada moodeelka ah ee bulshooyinka xawliga u koraya ee Alberta.

"Dad aad u badan ayaa dooranaya inay Alberta ka dhigaan gurigooda taasina waxay la macno tahay dugsiyadeena K-12 inay hoy u yihiin tiro sii kordhaysa oo arday ah. Waxaan siineynaa maamulka dugsiya goobo iyo agab dheeri ah, si ay u sii wataan shaqada muhiimka ah ee ay wax wax barayaan da'yarta Alberta."

Danielle Smith, Madaxa Dawladda

Maamul kasta oo dugsi oo ka tirsan gobolka ayaa heli doona qayb ka mid ah \$125-ka milyan ee kordhinta maalgelinta hawlgelinta. Qadarka ay heli karaan maamulka dugsi kasta waxaa lagu go'aamin doonaa iyadoo lagu salaynayo tirada ardayda ay u adeegto. Maalgelintan cusub waxa isticmaali kara maamulka dugsi si loo hubiyo in ay u qalabaysan yihiin si ay u taageeraan kobaca diiwaangelinta iyadoo shaqaaleysanaya macalimiin dheeraad ah iyo kaaliyayaasha waxbarashada. Intaa waxaa dheer, maalgelintan waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo si loo hubiyo in kor u kaca kharashaadka hawlgalka ayan ka qaadin waxbarashada ardayga.

"Iyadoo cadaadiska kharashka uu sii kordhayo, waxaan rabnaa inaan hubinno in maalgelinta waxbarashada aan laga weecin ardayda iyo fasallada. Maalgelinta dheeraadka ah ee aan siinno maamulka dugsi waxay gacan ka geysan doontaa ilaalinta khibrada fasalka ee ardaydeenna."

Demetrios Nicolaidis, Wasiirka Waxbarashada

Si loo daboolo baahida boosas arday oo badan, dawladda Alberta waxay maalgelinaysaa \$90 milyan sannad dugsiyeedkan si ay u taageerto dhismaha iyo rakibidda ilaa 100 fasallo moodeel cusub ah iyo raritaan ilaa 50 unug oo moodeel ah. Fasaladan moodeelka ah waxay siin doonaan maamulka dugsi ilaa 2,500 boosas cusub iyo 1,250 boosas la hagaajiyay oo loogu talagalay ardayda ku nool gobolka ee bulshooyinka xawliga u koraya ee ku nool magaalo-madaxda Calgary iyo Edmonton inta lagu jiro sannad dugsiyeedka 2024-25.

Saddexda sano ee soo socota, dawladda Alberta waxay siinaysaa in ka badan \$1.2 bilyan maamullada dugsiyada si wax looga qabto kobaca diiwaangelinta. Maalgelintani waxay taageeri doontaa shaqaaleysiinta in ka badan 3,100 macalimiin dheeraad ah iyo shaqaalaha taageerada fasalka, si qaybaha dugsi u maareeyaan tirada fasalka iyo tirada sii kordhaysa ee ardayda. In ka badan \$1.5 bilyan ayaa sidoo kale la bixiyaa si maamulka dugsi u taageero baahiyaha waxbarasho ee gaarka ah oo ay wax uga qabtaan fasallada adag iyaga oo siinaya ardaydooda wakhtiga diiradda la saarayo, taageerada iyo dareenka ay u baahan yihiin si ay u guulaystaan.

Xaqiiqooyinka degdegga ah

- Tirada ugu badan oo \$9.3 bilyan ah ayaa lagu kharash garayn doonaa nidaamka waxbarashada Alberta 2024-25, taasoo ka badan \$46 milyan maalin kasta oo ardaydu dugsiga ku jiraan.
- Dowladda Alberta waxa ay maalgelinaysaa \$2.1 bilyan si ay u horumariso 43 mashruuc oo dugsi oo mudnaan leh. Mashruucyadani waxay dhalin doonaan 35,000 goobo arday oo cusub oo la casriyeeyay.
- Maalgelinta \$90-milyan ee fasallada moodeelka ah si wax looga qabto cadaadiska is-diiwaangelinta ee sannad dugsiyeedka 2024-25 waxayna kabaysaa \$50 milyan oo lagu hagayo fasallada caadiga ah ee Miisaaniyadda 2024. Iyada oo loo marayo \$90-milyan maalgelinta fasallada moodeelka:
 - Guddiga Waxbarashada Calgary wuxuu heli doonaa ilaa 31 fasal oo moodeel cusub ah waxaana la rari doonaa ilaa 14.
 - Qaybta Dugsiga Kaatooliga ee Calgary waxay heli doontaa ilaa 14 fasal oo moodeel cusub ah waxaana la rari doonaa ilaa lix.
 - Dugsiyada Dadweynaha Edmonton waxay heli doonaan ilaa 26 fasal oo moodeel cusub ah waxaana la rari doonaa ilaa 11.
 - Guddiga Dugsiga Kaatooliga ee Edmonton wuxuu heli doonaa ilaa 17 fasal oo moodeel cusub ah waxaana la rari doonaa ilaa todobo.
 - Dugsiyada Rocky View waxay heli doonaan ilaa 12 fasal oo moodeel cusub ah waxaana la rari doonaa ilaa 12.

Warbaahinta kala duwan

- [Daawo shirka jaraa'id](#)